

Qaamo-qashiir

Qaamo-qashiirtu waa cudurada faafa waxaana sababo fayras. Inta badan ma aha mid halis ah, laakiin dhawr xaaladood ayaa sababi kara dhibaatooyin halis ah.

Qaadista qaamo-qabshiirta

Qaamo-qashiirta waxaa lagu kala qaadaa qufaca iyo hindhisada.

Fayrasku gudaha ayaa loo neefsan karaa ama waxa soo qaadi karaa sagxadaha uu cudurka gaaray.

Qofka qaba qaamo-qashiirk ka hor inta aanay astaamuhu soo ifbixin iyo dhawr maalmood ka dib.

Astaamaha qaamo-qashiirta



daamanka oo ku barara



dareemida xanuun
marka qofka wax
laqaayo



qandho



madax xanuun



murqo xanuun

Astaamaha ugu badan qaamo-qashiirk waa qaybta wejiga ee ka hooseysa dhagaha oo qofka bararto iyadoon xanuun daran leh. Astaaha kale waxaa ka mid ah inaad jirato, afka ku qalalo, caloosha ku xanuunto, dareentid daal iyo cunto xumo. Haddii uu kugu dhaco qaamo-qashiir waxaad dareemi doontaa caafimaad darro 1 - 2 toddobaad. Ma jirto wax daawayn ah ama daawo oo ay leedahay qaamo-qashiirtu.

Haddii aad u malaynayo inaad qabtid qaamo-qashiir, waa muhiim inaad wacdo dhakhtarkaaga.

Waxaad u baahan doontaa inaad ka fogaaato dadka kale si aad uga fogaaato inaad faafiso cudurka.

Dhibaatooyinka suurtagalka ah



xiniinyaama
ugxn-sidaha oo
ku soo barara



dhaga beel



qoorgooye



xameetida oo
ku soo bararta




maskaxda oo
ku soo bararto


Tirakoobka Qaamo-qashiirka

1 ka mid ah 4tii wiil iyo dhalin ee uu ku dhaco qaamo-qashiirta ayuu xiniinyaha soo bararaa.

Wax yar kala badhka dadka uu saameeyay waxay dareemaan xoogaa inuu soo yaraado xiniinyahooda wixii intas ka danbeeyo.



10kii ninba 1 ayaa la kulma hoos u dhaca ku yimaad tirada shahwadooda (xadadka shahwada caafimaadka qabta ee jirkoodu soo saari karo) ka dib markii uu ku dhacay caabuqa qaamo-qashiirta.



1 kamid ah 1,000 qof ee ku dhaco qaamo-qashiirta ayaa sababta caabuqa ku dhaco maskaxda oo marar dhif ah loo dhiman kara.



Ka hortagga qaamo-qashiirta

Tallaalka MMR waa qaabka kaliya looga hortago qaamo-qashiirta.

Qof walba wuxuu u baahan yahay laba kuuro oo tallaalka MMR ah, waxaa la doorbidi in la siiyo marka uu jiro 1 sano iyo marka uu jiro 3 sano iyo 4 bilood. Tallaalka MMR wuxuu kaloo qofka ka difaacea jadeecada iyo qaamo-qashiirta.

Tallaalka MMR si fiican ayay u shaqeeysa. Marka la qaato 2 kuuro ka dib, 88% dadka ayaa laga difaaci doona qaamo-qashiirta.

Tallaalku waa mid lacag la'aan uu ku heli karo qof walba. Haddii adiga ama ilmahaagu aad seegaan kuure, la xidhiidh dhakhtarkaaga si aad u hesho. Marnaba kama weynaanaysid inaad qaadatid tallaalka.

kuuraha 1aad da'da 1




kuuraha 2aada da'da 3 sano iyo 4 bilood



Xog dheeraad oo ku saabsan qaamo-qashiirta



(nhs.uk)



(ox.ac.uk)

Xog dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka MMR



(nhs.uk)

Kani maaha qalab lagu baadho. Haddii aad u malaynayo in ilmahaagu qabo qaamo-qashiir, wac dhakhtarkaaga ama 111 isla markaaba.

Waxaa diyaariiyay NHS North Central London Integrated Care Board.